Fasenra® (benralizumab)

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan daaweynta cudurkaaga neeftaada daran

Ku soo dhawoow buug-yarahaaga macluumaadka bukaanka!

Buugan yarahan waxaad ka heli doontaa:

- **Macluumaadka bukaanka ee Fasenra** (Bogagga 2 ilaa 6)
- **Tilmaamaha isku-durida Fasenra** (Bogagga 7 ilaa 11)
- **Qorshahaaga daawaynta Fasenra** (Bogagga 12 ilaa 18)

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay bukaanada UK ee loo qoray Fasenra si looga daaweeyo neefta daran ee leh unugyada 'eosinophilic' (eosinophilic asthma). Ma beddelayo Xaashida Macluumaadka Bukaanka oo ay tahay inaad la akhrido buug-yarahan ee laga heli karo baakidh kasta oo Fasenra ah.

Fasenra® 360°

Taageerada socota ee safarkaaga daawaynta

Khadka taleefoonka ee bukaanka:
08004 700329

Isniin-Jimco 8-da subaxnimo - 6-da galabnimo | Sabti 9-ka subaxnimo - 5-ta galabnimo
Wixii ka baxsan saacadaha shaqada fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama farmashiistaha, ama haddii ay dhacdo xaalad gurmad ah wac 999.

Buug-yarahan waxaa soo saartay oo ay maalgelisay AstraZeneca, soo saaraha dawada Fasenra.

GB-66178 I Ogosto 2025

Waa maxay neefta leh unugyada 'eosinophilic ' (eosinophilic asthma)?

'Eosinophils' waa nooc ka mid ah unugyada dhiiga cad. Unugyadani waxay ka shaqeeyaan inay jidhkaaga ka ilaaliyaan caabuqyada qaarkood.

Caadiyan, 'eosinophils' waxay ku noolaadaan gudaha jidhkaaga wakhti gaaban kadibna jidhkaaga ayaa saaraya marka ay dhameeyaan shaqadooda.

Laakiin dadka qaba neefta leh unugyada 'eosinophilic', waxaa dhiigga ku jira unugyada eosinophils aad u bada, kuwaas oo gala sambabada, taasi oo keenayso caabuq keenayo dhibaatooyin ah dhanka neefsashada.

Dhakhtarkaagu wuxuu go'aamiyay in astaamaha neeftaadu ay xiriir la leeyihiin heerarka sare ee unugyada 'eosinophils'.



Muxuu dhakhtarkaagu u qoray dawada Fasenra?

Fasenra waa daaweyn la isku duri karo oo loogu talagalay neefta daran ee leh unugyada 'eosinophilic' oo si toos ah u beegsata unugyada 'eosinophils', iyadoo ka caawineyso jirkaaga inuu dhiiggaaga iyo sambabadaada ka saaro unugyadaas.

Tani waxay yareyn kartaa tirada qabashooyinka neefta ee kugu dhaca, waxay kaa caawin kartaa inaad si fiican u neefsato waxayna yareyn kartaa astaamahaaga neefta.

Waa muhiim inaad sii wado qaadashada wixii kaloo ah daawayn loogu talagalay neefta (aalada neefta lagu jiito (inheelarada/kiniinada) ee uu dhakhtarkaagu kuu qoray.



Haddii aad qaadanayso daawooyinka ' corticosteroids' ee afka laga qaato, isticmaalka Fasenra ayaa sidoo kale laga yaabaa inay kuu ogolaato inaad yarayso qiyaasta maalinlaha ah ee loo baahan yahay si loo xakameeyo xanuunkaaga neeftaa ama aad gebi ahaanba joojiso qaadashadooda.
Waa inaad raacdo talada dhakhtarkaaga ee tani ku saabsan.

Sideed u qaadan doontaa cirbadda Fasenra?

Dhakhtar, kalkaaliso ama xirfadle kale oo daryeelka caafimaadka ayaa cirbado kaa siin doona maqaarka hoostiisa ee qaybta sare ee cududa, ubacda ama bowdada.

In dhakhtarkaagu ama kalkaalisadaadu kuu sheegaan si sidaa ka duwan mooyaane, jadwalka daawayntaadu waxa uu ahaan doonaa sida hoos ku cad:

Sannadka ugu horreeya ee daaweynta Fasenra



Haddii aadan qabsan karin ballantaada Fasenra ama aad seegtay garoojo Fasenra ah: la xidhiidh dhakhtarkaaga ama kalkaalisada sida ugu dhakhsaha badan si aad dib ugu qabsato ballantaada.

Joojinta daaweynta Fasenra: ha joojin daaweynta Fasenra in dhakhtarkaagu kugula taliyo mooyee. Hakinta ama joojinta daawaynta Fasenra waxay keeni kartaa in astaamaha iyo qabashooyinka xanuunka neeftaada ay soo noqdaan.

Ma jiraan wax waxyeellooyin ah oo ka dhasho daawaynta Fasenra?

Sida daawooyinka oo dhanba, waxaa suurtogal ah in aad waxyeellooyin qaar kala kulanto daawaynta Fasenra laakiin ma aha in qof kasta ay ku dhacayaan waxyeellooyinka.

Waxyeellooyinka ugu badan, ee saameyn kara ilaa 1 qof 10-kii bukaan ee qaba neefta, waxaa ka mid ah:

- Madax xanuun
- Dhuun xanuun
- Qandho (heerkul sare)
- Falcelinta goobta la muday (tusaale, xanuun, casaan noqosho, cuncun, bararka meel u dhow meesha cirbada laga qaatay)

Dadka qaar ayaa laga yaabaa inay yeeshaan falcelino xasaasiyadeed.

Falcelinadan in badan ayay dhacaan (waxay saameeyn karaan ilaa 1 qof 10-kii qofba)

Astaamaha waxaa caadiyan ka mid ah:

- Caaro
- Finan

Haddii aad la kullanto wax waxyeellooyin ah, fadlan la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama farmashiistaha.

Xaaladaha qaarkood, bukaanada ayaa laga yaabaa inay la kulmaan falcelin xasaasiyadeed oo daran oo loo yaqaan 'anaphylaxis'.

Si kastaba ha ahaatee, inta jeer lama go'aamin karo marka lagu saleeyo xogta la heli kara. Astaamaha waxaa caadiyan ka mid ah:

- Bararka wajigaaga, carrabkaaga, ama afkaaga
- Dhibaatooyinka neefsashada
- Suuxdin, dawakhaad, wareer (waxaa sabab u ah hoos u dhaca cadaadiska dhiigga)

Isla markiiba raadso daryeel caafimaad haddii aad u malaynayso inaad qabtid falcelin xasaasiyadeed.

Falcelinada noocan oo kale ah waxay ku dhici karaan saacado ama maalmo gudahood ka dib duritaanka.

Fadlan tixraac Xaashida Macluumaadka Bukaanka ee ku jira xirmada Fasenra si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyeellooyinka suurtagalka ah.

La socodsiinta dhakhtarkaaga sida daawayntaadu u socoto

Dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaadu waxay rabi doonaan inay ogaadaan in astaamaha neeftaadu ay ka soo raynayaan ama inay sii wadaan inay saameeyaan nolol maalmeedkaaga.

Ballantaada ka hor, ku qaado dhawr daqiiqo inaad ka fikirto qodobada hoose si aad u siiso sawir guud oo sax ah oo ku saabsan sida aad u caafimaad qabto.

Neefsashada

Miyaad qufacaysaa mise ma hiinraageysaa?

Qabashooyinka neefta

Immisa (haddii ay jiraan) ayaad la kulantay?

Intee in le'eg ayay darantahay?

Daawooyinka

Miyaad bamka kahortaga xanuunka neefta ah u isticmaashaa sida lagu faray?

Immisa jeer ayaad isticmaashaa bamkaaga xanuunka neefta si neefta kuugu fududaato?

Immisa kiniin oo 'corticosteroid' ah ayaad qaadanaysaa?

Hurdada

Neeftaadu miyay kaa horjoogsanaysaa inaad hurdo fiican hesho habeenkii?

Hawlaha maalinlaha ah

Hadda miyaad leedahay awood sare oo aad ku qabato hawlo gaar ah (tusaale dukaamaysiga, socodka) oo ka badan intii aad lahayd kahor inta aadan daawaynta bilaabin?

Wax dhibaato ah miyaad kala kulantaa hawlaha qaarkood?

Halka laga heli karo macluumaad dheeraad ah

Haddii aad wax su'aalo ah ama walaacyo ah qabtid, waa inaad la hadashaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama farmashiistaha. Waa inaad sidoo kale akhridaa Xaashida Macluumaadka Bukaanka maadaama uu tani ku jira macluumaad faa'iido leh. Waxaad Xaashida Macluumaadka Bukaanka ka heli kartaa baakidh kasta oo Fasenra ah.

Isku-durida FASENRA® (benralizumab)

Qalinka hore loo buuxshay

Kahor intaadan isticmaalin Qalinkaaga Fasenra, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka waa inuu adiga ama daryeelahaagu idin tuso sida si sax ah loogu isticmaalo.

Akhri 'Tilmaamahan Isticmaalka' ka hor inta aadan bilaabin isticmaalka Qalinkaaga Fasenra iyo mar kasta oo aad hesho dib u buuxin. Waxaa laga yaabaa inuu jira macluumaad cusub. Macluumaadkani beddel uma noqonayo inaad bixiyahaaga daryeelka caafimaadka kala hadasho wax ku saabsan xaaladaada caafimaad ama daawayntaada.

Haddii adiga ama daryeelahaaga aad wax su'aalo ah qabtaan, la hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Macluumaad Muhiim ah

Ku kaydi Fasenra qaboojiye u dhexeeya 2°C ilaa 8°C iyadoo ku jirta kartoonkeeda ilaa aad diyaar u noqoto inaad isticmaasho. Fasenra waxa lagu kaydin karaa heerkulka qolka oo gaarayo ilaa 25ºC ugu badnaan 14 maalmood. Ka dib marka laga soo saaro qaboojiyaha/ talaagada, Fasenra waa in la isticmaalo 14 maalmood gudahood ama waa in la tuuraa

Ha isticmaalin Qalinkaaga Fasenra haddii:	**Ha:**
• la barafeeyay • dhulka ku dhacay ama waxyeello gaadhay • la jebiyay shaabadda amniga ee kartoonka • taariikhda dhicitaanku (EXP) la dhaafay	• ruxin Fasenra Pen kaaga • wadaagin ama dib u isticmaalin qalinkaaga Fasenra

Haddii mid ka mid ah kuwan kor ku xusan ay dhacaan, ku tuur Qalinka Fasenra weel loogu talagalay waxyaabaha fiiqan oo iska caabiyo durida oo isticmaal Qalinka Fasenra oo cusub.

Qalin kasta oo Fasenra ah wuxuu ka kooban yahay 1 garoojo oo Fasenra ah oo loogu talagalay in hal mar la isticmaalo.

Fasenra iyo dhammaan dawooyinka ka fogee meel ay carruurtu ka arki karaan oo ay gaari karaan.

Tilmaamo loogu latalagalay isticmaalka Qalinkaaga Fasenra

Ha ka saarin furka ilaa aad ka gaarto Tallaabada 6-aad ee tilmaamahan oo aad diyaar u noqoto inaad isku durto Fasenra.



Talaabada 1-aad - Isu-keen Saadka

- 1 ah Qalinka Fasenra oo laga soo saaro qaboojiyaha
- 1 masaxaad
- 1 suuf ama faashad
- 1 ah weel loogu talagalay waxyaabaha fiiqan oo iska caabiyo durida.
  (Eeg tilaabada 10-aad - Si badbaado leh u tuurida qalinka Fasenra ee la isticmaalay)

Qallinka Fasenra	Masaxaad	Suuf ama faashad	Weelka waxyaabaha fiiqan

Tallaabada 2-aad - U diyaargarow inaad isticmaasho Qalinkaaga Fasenra

Eeg taariikhda dhicitaanka (EXP). Ha isticmaalin haddii taariikhda dhicitaanku la dhaafay.

Kahor is-durida, u ogolow qalinka horay loo buuxshay inuu gaaro heerkulka qolka oo ah 20 °C ilaa 25 °C adigoo kartoonka ka tagaya dibadda qaboojiyaha ilaa 30 daqiiqo.

Ha ku diirin Qalinka Fasenra qaab kale. Tusaale ahaan, ha ku diirin makrooweefka ama biyo kulul, ama ha dhigin meel u dhow ilaha kale ee kulaylka.

Isticmaal Fasenra 14 maalmood gudahooda marka laga soo saaro qaboojiyaha.

Ha ka saarin furka ilaa aad ka gaarto Tallaabada 6-aad.

Tallaabada 3-aad - Eeg dareeraha

Dareeraha ku jira Qalinka Fasenra ka eeg daaqadda lagala soconayo. Dareeraha waa inuu noqdaan kuwa cad/saafi ah oo aan midab lahayn ilaa jaalle. Waxaa dhici karta inay ku jiraan quruurux yaryar oo caddaan ah.

Ha isku durin Fasenra haddii dareeruhu leeyihiin daruuro, midab beddel ah, ama ay ku jiraan waxyaabo/qaybo waaweyn.

Waxaa laga yaabaa inaad xumbo yar oo hawo ah ku aragto dareeraha. Tani waa caadi. Uma baahnid inaad wax ka qabato.



Tallaabada 4-aad - Dooro goobta duritaanka

Goobta duritaanka ee lagu talinayo waa xagga hore ee bowdadaada. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa qaybta hoose ee ubacdaada.

Ha durin:

- 5ta sintimiitir (cm) ee ku hareereysan xuduntaada
- goob uu maqaarku ka jilicsan yahay, leeyahay nabarro, qolfo ama adag yahay
- goobo leh nabarro ama maqaarku dhaawacan yahay
- adigoo cirbada ka dusinayo dharka

Daryeel bixiye ayaa dhici karta inuu kaa duro qaybta sare ee cududa, bowdada, ama ubacda. **Ha** isku dayin in aad isku durto cududa.

Durid kasta, dooro meel gooni ah oo u jirta ugu yaraan 3 sintimitir u jirta meeshii markii ugu dambeysay la duray.



Tallaabada 5-aad - Nadiifi goobta duritaanka



Gacmahaaga si fiican ugu dhaq saabuun iyo biyo.

Nadiifi goobta duritaanka adigoo masax aalkolo ah si goobaab ugu masaxayo. Hawada ku qallaji.

Ha taaban meesha aad nadiifisay ka hor inta aadan durin.

Ha ku furin marawaxad ama ha afuufin aagga la nadiifiyey.

Tallaabada 6-aad - Ka saar furka

Ku qabo Qalinka Fasenra 1 gacan Si taxadar leh oo toos ah uga jiid furka adigoo adeegsanayo gacantaada kale.

Furka dhinac u dhig si aad goor dambe u tuurto.

Ilaaliyaha cirbadda ee cagaaran ayaa hadda muuqata. Wuxuu halkaa ugu jiraa inuu kaa ilaaliyo inaad taabato cirbadda.

Ha isku dayin inaad taabato cirbadda ama inaad fartaada ku riixdo ilaaliyaha cirbadda.

Ha isku dayin inaad furka ku celiso Qalinka Fasenra. Waxaad sababi kartaa in duritaanku dhao goor hore ama waxaad waxyeelayn kartaa cirbadda.

Buuxi tillaabooyinka soo socda isla markaaba ka dib markaad furka ka saarto.



Tallaabada 7-aad - Isku dur Fasenra

Raac tilmaamaha bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ee ku saabsan sida la isku duro. Waxaad si tartiib ah u qanjaruufi kartaa goobta duritaanka ama waxaad isku duri kartaa cirbadda adigoon maqaarka qanjaruufin.

Isku dur Fasenra adigoo raacaya tillaabooyinka sawirada **a, b, c** iyo **d**.

Ku hay Qalinka Fasenra meesha muddada durista oo dhan.
Ha beddelin booska Qalinka Fasenra ka dib marka duritaanka bilowdo.



A

Qalinka Fasenra saar goobta duritaanka.

Ilaaliyaha cirbadda ee Qalinka Fasenra si siman ugu qabo maqaarkaaga (xagal 90-degree ah). Xaqiiji inaad arki karto daaqadda lagala soconayo.



B

Si adag hoos ugu cadaadi.

Waxaad maqli doontaa shanqar qajaq ah. **"shanqarta dhag dhahda'** waxay kuu sheegaysaa in duritaanku bilaabmay. Cinjirka cagaaran ayaa hoos uga dhaadhici doona daaqadda lagala soconayo inta duritaanku socdo.



C

Si adag ugu qabo 15 ilbiriqsi.

Waxaad maqli doontaa **'shanqar qajaq ah'** oo labaad. Shanqarta dhag dhahda ee labaad waxay kuu sheegaysaa in duritaanku dhammaaday. Badhanka cagaaran ayaa buuxin doona daaqadda lagala soconayo.



D

Si toos ah kor ugu qaad Qalinka Fasenra.

Ilaaliyaha cirbadda ayaa hoos u simbiriirixan doona oo ku xirmi doona cirbadda korkeeda.

Tallaabada 8-aad - Eeg daaqadda lagala soconayo

Eeg daaqadda lagala soconayo si aad u xaqiijiso in dareeraha oo dhan la isku duray.

Haddii cinjirka cagaaran uusan buuxin daaqadda lagala soconayo, waxaa dhici karta inaadan helin qiyaasta oo dhammaystiran. Haddii tani dhacdo ama haddii aad qabto wax kaloo walaacyo ah, wac bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Kahor duritaanka



Durida ka dib



Talaabada 9-aad - Eeg goobta duritaanka

Waxaa laga yaabaa in uu jiro qadar yar oo dhiig ah ama dareere ah oo ka imanayo meesha aad durtay. Tani waa caadi.

Si tartiib ah cadaadis u saar maqaarkaaga adigoo adeegsanayo kubad suuf ah ama faashad ilaa uu dhiiggu joogsado.

Ha xoqin goobta duritaanka.

Haddii loo baahdo, goobta duritaanka ku dabool faashad yar.



Talaabada 10-aad - Si badbaado leh u tuurida Qalinka Fasenra ee la isticmaalay

- Qalin kasta oo Fasenra ah wuxuu ka kooban yahay hal garoojo oo Fasenra ah oo **dib looma isticmaali karo.**
- Geli Qalinkaaga Fasenra ee aad isticmaashay **weel loogu talagalay waxyaabaha fiiqan** oo iska caabin kara duritaanka isla markaaba isticmaal ka dib.

Ha ku tuurin Qalinka Fasenra qashinka gurigaaga.

Furka iyo saadka kale ee la isticmaalay ku tuur qashinka gurigaaga.

Hagitaanada tuurida

Weelka buuxa u tuur sida uu ku faray bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama farmashiistaha. **Dib ha u** isticmaalin weelkaaga loogu talagalay waxyaabaha fiiqan ee aad isticmaashay.

Qorshahaaga daaweynta neefta daran adigoo isticmaalaya Fasenra® (benralizumab)

Isticmaal qaybtan si aad ula socoto jadwalkaaga daawaynta, isbeddelada ku yimaad astaamaha iyo horumarkaaga guud inta lagu gudajiro daawaynta Fasenra.

Magaca:

Magaca dhakhtarka/kalkaalisada:

La socoshada sida wanaagsan ee Fasenra kuugu shaqaynayso

Fadlan buuxi qaybtan adiga oo caawimo ka helayso dhakhtarkaaga/ kalkaalisadaada

Si lagaaga caawiyo fududaynta astaamaha neeftaada, dhakhtarkaagu ayaa kuu qoray Fasenra.

Daaweyntan waxaa lagugu siinayaa cirbad sidaa darteed waxaa dhici karta inay ka duwan tahay daawooyinka kale ee neefta ee aad hore u isticmaashay. Qaybtan waxaa loogu talagalay inay ku caawiso inta daawayntaada ay socoto oo dhan.

Haddii aan si kale laguu sheegin, daawayntaada ayaa lagu siin doonaa afartii toddobaadba mar muddada saddexda irbadood ee ugu horreeya ka dibna waxaa lagu siin doonaa siddeeddii toddobaadba hal mar. Waa muhiim inaad sii wado qaadashada wixii kaloo ah daawayn loogu talagalay neefta (aalada neefta lagu jiito (inheelarada/kiniinada) ee uu dhakhtarkaagu kuu qoray.

*Ballan kasta ka hor, fadlan buuxi **'raad-raacaha astaamaha'** ee ku yaal bogagga 15 & 16. Buug-yarahan u soo qaado ballan kasta si aad uga caawiso dhakhtarkaaga ama kalkaalisada inay fahmaan sida aad u waddo daawayntaada.*

Markaad bilowdo daawaynta Fasenra, waxaa sidoo kale ku caawin kara inaad qorto yoolalkaaga mustaqbalka dhow iyo muddada-dheer ee ku yaal bogga 17-aad, ka dibna aad eegto inta aad gaari karto.

Qorshahaaga daaweynta neefta

Fasenra	3-da duritaano ee ugu horeeya 4-tii asbuucba mar, kadibna 8-dii asbuucba mar intaa ka dib

Daawooyinkaaga maalinlaha ah

Mid kasta oo ka mid ah daawooyinkaaga neefta ee maalinlaha ah ku tax safafka hoose:

Daawooyinka	Garoojada maalinlaha ah, tusaale ahaan tirada neef-ku-qaadashada ama kiniinnada

Inheelarkaaga buluuga ah (haddii aad haysato)

Waxaa laga yaabaa inaad qaadato wax badan ama yar oo ah inheelarkaaga buluuga ah iyadoo ku xiran astaamahaaga neefta, markaa fadlan qor garoojadaadii ugu dambeysay:

Daawooyinka	Garoojada, tusaale ahaan tirada neef isku buufinta	Intee in le'eg ayay qaadatay in astaamuhu ka soo reeyaan?

Haddii ay neefta ku qabato, raadso talo caafimaad oo degdeg ah, wac 999 oo raac qorshe hawleedkaaga shakhsiyeed ee neefta

La socoshada horumarka

Waxaa fikrad wanaagsan ah inaad qorto isbeddelada ku yimaado astaamahaaga neefta si aad uga caawiso dhakhtarkaaga ama kalkaalisada inay la socdaan horumarkaaga daaweynta.

Buuxinta xaashida hoose ayaa waxay ku siin doontaa diiwaan sax ah oo ku saabsan sida aad dareemaysay ka hor inta aadan bilaabin daawaynta Fasenra. Markaad isbarbardhigto macluumaadkan iyo macluumaadka la geliyo inta lagu gudajiro daawayntaada Fasenra waxaad awoodi doontaa inaad aragto in astaamahaagu ay fududaanayaan iyo inaad awoodo inaad qabato hawlo maalmeed kugu adkaa markii hore iyo in kale.

Kahor intaadan bilaabin guudmarka Fasenra ee neeftaada

Sideed u qiimeyn lahayd astaamaha neeftaadu? Laga bilaabo 1-5 halka 1 uu yahay 'Fiican', 5 -na tahay 'Xun'	
Immisa jeer ayay astaamahaagu saameeyaan hurdadaada? Laga bilaabo 1-5 halka 1 uu yahay 'Nadir', 5-na tahay 'Habeen kasta'	
Immisa jeer ayaad usbuucii u baahan tahay inaad isticmaasho inheelarkaaga degdegga ah?	
Immisa jeer ayay neeftu ku qabatay 6-dii bilood ee la soo dhaafay?	
Immisa koorso oo ah kiniinnada 'steroid' ee afka laga qaato ayaad qaadatay 6-dii bilood ee la soo dhaafay?	
6-dii bilood ee la soo dhaafay, imisa jeer ayaad isbitaalka aaday maadaama ay neeftaadu ka sii dartay?	
Ma leedahay wax ah waxyeellooyin ka dhashay daawaynta? Haa ama Maya	
Hadday **haa tahay**, maxay yihiin?	
Ma jiraan wax ah hawl maalmeed oo aadan awoodin inaad sameyso?	
Hadday **haa tahay**, maxay yihiin?	

Inta daawayntaadu sii socoto, dib ugu noqo boggan si aad u aragto inay wax isbeddeleen iyo in kale.

Inta lagu jiro gudmarka daaweynta Fasenra ee neeftaada

Lambarka duritaanka	2 Taariikhda:...........	3 Taariikhda:...........	4 Taariikhda:...........
Tan iyo duritaankaagii ugu dambeeyay ee Fasenra:			
Sideed u qiimeyn lahayd astaamaha neeftaadu? Laga bilaabo 1-5 halka 1 uu yahay 'Fiican', 5 -na tahay 'Xun'			
Immisa jeer ayay astaamahaagu saameeyaan hurdadaada? Laga bilaabo 1-5 halka 1 uu yahay 'Nadir', 5-na tahay 'Habeen kasta'			
Inta jeer ee aad usbuucii u baahan tahay isticmaasho inheelarkaaga degdegga ah?			
Immisa jeer ayay neeftu ku qabatay?			
Immisa koorso oo ah kiniinnada 'steroid' ee afka laga qaato ayaad qaadatay?			
Immisa jeer ayaad isbitaalka aaday maadaama ay neeftaadu ka sii dartay?			
Ma leedahay wax ah waxyeellooyin ka dhashay daawaynta? **Haa** ama Maya			
Hadday **haa tahay**, maxay yihiin?			
Ma jiraan wax hawlo maalmeed ah oo aadan samayn karin/sameyn karto hadda? Haa ama Maya			
Hadday **haa tahay**, maxay yihiin?			

Inta lagu jiro gudmarka daaweynta Fasenra ee neeftaada

Lambarka duritaanka	5 Taariikhda:...........	6 Taariikhda:...........	7 Taariikhda:...........	8 Taariikhda:...........
Tan iyo duritaankaagii ugu dambeeyay ee Fasenra:				
Sideed u qiimeyn lahayd astaamaha neeftaadu? Laga bilaabo 1-5 halka 1 uu yahay 'Fiican', 5 -na tahay 'Xun'				
Immisa jeer ayay astaamahaagu saameeyaan hurdadaada? Laga bilaabo 1-5 halka 1 uu yahay 'Nadir', 5-na tahay 'Habeen kasta'				
Inta jeer ee aad usbuucii u baahan tahay inaad isticmaasho inheelarkaaga degdegga ah?				
Immisa jeer ayay neeftu ku qabatay?				
Immisa koorso oo ah kiniinnada 'steroid' ee afka laga qaato ayaad qaadatay?				
Immisa jeer ayaad isbitaalka aaday maadaama ay neeftaadu ka sii dartay?				
Ma leedahay wax ah waxyeellooyin ka dhashay daawaynta? **Haa** ama Maya				
Hadday **haa tahay**, maxay yihiin?				
Ma jiraan wax hawlo maalmeed ah oo aadan samayn karin/sameyn karto hadda? Haa ama Maya				
Hadday **haa tahay**, maxay yihiin?				

Yoolalkayga

Maxaad jeclaan lahayd inaad samayso oo uu xanuunkaaga neeftu kaa hortaaganyahay?

Ujeedada qaybtan waa inaad diiwaan geliso yoolalkaaga mustaqbalka dhow ka dib markaad bilowdo daaweynta Fasenra. Ka fakar hawl maalmeed kugu adkaan jirtay neeftaada awgeed, tusaale ahaan inaad keligaa dukaamada u lugeyso.

Yoolalkayga mudada gaaban

(Tusaale ahaan: u lugee dukaamada, samee xoogaa shaqada guriga ah, wax kari adigoo taagan)

....

....

....

Fadlan buuxi boggan adiga caawimo ka helaya dhakhtarkaaga/ kalkaalisadaada

Adigoo ka fikiraya wixii aad qabatay dhowrkii bilood ee la soo dhaafay, maxaad jeclaan lahayd inaad gaarto bilaha soo socda?

Qaybtan, waxaad diiwaangelin kartaa hawl kasta oo weyn oo aad hore kugu adkayd inaad samayso ama aad ka fogaan jirtay neeftaada awgeed.

Yoolalkayga mudada dheer

(Tusaale ahaan: ku soo raaxayso dibada maalmaha Dhammaadka todobaadka, u bax inaad in yar baaskiil ku soo kaxayso agagaarka beerta, la ciyaar carruurtayda/carruurta ilmahayga)

....

....

....

Mar kasta oo aad ballan la leedahay dhakhtarkaaga/kalkaalisadaada, bal eeg si aad u aragto waxa aad qabatay/yoolalka aad gaartay oo calaamada sax saar si aad u tusiso horumarka aad samaynayso.

Macluumaad ku saabsan waxyeellooyinka suurtagalka ah

Sida daawooyinka oo dhanba, waxaa suurtogal ah in aad waxyeellooyin qaar kala kulanto daawaynta Fasenra laakiin ma aha in qof kasta ay ku dhacayaan waxyeellooyinka.

Waxyeellooyinka ugu badan, ee saameyn kara ilaa 1 qof 10-kii bukaan ee qaba neefta, waxaa ka mid ah:

- Madax xanuun
- Dhuun xanuun
- Qandho (heerkul sare)
- Falcelinta goobta duritaanka (tusaale ahaan xanuun, casaan, cuncun, bararka meel u dhow meesha la muday)

Haddii aad la kullanto wax waxyeellooyin ah, fadlan la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama farmashiistaha.

Dadka qaar ayaa laga yaabaa inay yeeshaan falcelino xasaasiyadeed.

Falcelinadan in badan ayay dhacaan (kuwani waxay saameeyn karaan ilaa 1 qof 10-kii qofba)
Astaamaha waxaa caadiyan ka mid ah:

- Caaro
- Finan

Xaaladaha qaarkood, bukaanadu waxay la kulmi karaan falcelin xasaasiyadeed oo daran oo loo yaqaan 'anaphylaxis'. Si kastaba ha ahaatee, inta jeer ee ay dhacayso laguma go'aamin karo xogta la hayo.
Astaamaha waxaa caadiyan ka mid ah:

- Bararka wajigaaga, carrabkaaga, ama afkaaga
- Dhibaatooyinka neefsashada
- Suuxdin, dawakhaad, wareer (waxaa sabab u ah hoos u dhaca cadaadiska dhiigga)

Isla markiiba raadso daryeel caafimaad haddii aad u malaynayso inaad qabtid falcelin xasaasiyadeed. Falcelinada noocan oo kale ah waxay ku dhici karaan saacado ama maalmo gudahood ka dib duritaanka.

Fadlan tixraac Xaashida Macluumaadka Bukaanka ee ku jira xirmada Fasenra si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyeellooyinka suurtagalka ah.

Halka loo aada taageero iyo talo

Kani buuxi adigoo caawimo ka helayo dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada:

Magaca dhakhtarka/kalkaalisada:

Macluumaadka xiriirka:

Xusuusino:

Soo sheegida waxyeellooyinka

Haddii aad la kullanto wax waxyeellooyin ah, la hadal dhakhtarkaaga, farmashiistaha ama kalkaalisada. Tan waxaa ku jira waxyeellooyin kasta oo suurtagal ah oo aan lagu xusin warqadda ku jirta xidhmada.

Waxaad sidoo kale waxyeellooyinka si toos ah ugaga soo warbixin kartaa Qorshaha Kaarka Jaalaha ee laga helo: **www.mhra.gov.uk/yellowcard**

Markaad ka soo warbixiso waxyeellooyinkan, waxaad gacan ka geysan kartaa inaad bixiso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan badqabka daawadan.

Fasenra® 360°

Taageerada socota ee safarkaaga daawaynta

Khadka taleefoonka ee bukaanka: 08004 700329

Isniin-Jimco 8-da subaxnimo - 6-da galabnimo | Sabti 9-ka subaxnimo - 5-ta galabnimo
Wixii ka baxsan saacadaha shaqada fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama farmashiistaha, ama haddii ay dhacdo xaalad gurmad ah wac 999.

Waxaa soo saaray oo maalgeliyay:

AstraZeneca